



# Kusaabsan Help Me Grow

Help Me Grow waa nidaam taageerooyin ah oo loogu talagalay haweenka xaamilada ah, daryeelayaasha haya dhallaanka cusub, iyo qoysaska ay u joogaan carruurta yaryar ee qaba dib u dhacyada iyo naafooyinka korriinka.

Adeegyada iyo taageerooyinka waxaa lagu bixiyaa Booqashada Guriga iyo Barbaarinta Caruurta, iyadoo labaduba qoysaska ka taageero korna u qaado koritaanka caafimaadka qaba iyo koboca dhallaanka, carruurta yaryar iyo qoysaskooda.



Adeegyada iyo taageerooyinka waxaa laga heli karaa gobolka oo dhan, waxaana bixiya xirfadlayaal ku sugan deegaankaaga.

**Ka agdhawow  
adeegyada Booqashada  
Guriga ama Barbaarinta  
Caruurta maantaba!**



Foomka gudbinta onlaayinka ka buuxi  
[www.helpmegrow.org](http://www.helpmegrow.org).



Wac 1 (800) 755-GROW (4769)  
si aad ula hadasho khabiirkha qabashada



## BOOQASHA DA GURIGA



[www.helpmegrow.org](http://www.helpmegrow.org)

## BARBAARINTA CARUURTA



Department of  
Developmental  
Disabilities



95%

In ka badan **95 boqolkiiba** ee waalidiinta Ohio ee adeegyada Barbaarinta Caruurta u helay dhallaankooda waxay sheegeen inay si wanaagsan awood ugu yeeshen in dhallaankooda ay ka taageeraan barashada waxyaabo cusub iyo kasbashada xirfado cusub.

Adeegyada Help Me Grow waxay gacan ka geystaan kobcinta cilaqaad caafimaad leh, waaya-aragnimo, iyo deegaano lagu taageero horumarka maskaxda, **80 boqolkiiba** oo kamid ah waxay dhacaan kahor saddex sano jir.

48%

Haweenka xaamilada ah ee kaeqbataay Booqashada Guriga waxay **48 boqolkiiba** aysan u badneyn inay dhalaan ilmo miisaankoodu hooseeyo.



## Waa maxay WBarbaarinta Caruurta?




Department of  
Developmental  
Disabilities

Barnaamijka Barbaarinta Caruurta wuxuu taageeraa qoysaska ay u joogaan carruurta da'doodu ay u dhaxeyso dhalashada ilaa saddex jir kuwaas oo qaba dib u dhacyada ama naafooyinka koritaanka si markaa ay u helaan bilowga ugu wanaagsan nolosha ee suuragalka ah.

Xirfadlayaasha barnaamijka Barbaarinta Caruurta waxay la shaqeeyaa qoyska canugga si ay u aqoonsadaan awodaha iyo baahiyaha waxna uga qabtaan walaacyada korriinka goor horeba sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Adeegyada waxaa laga bixiyaa halka qoysaska ay ku nool yihiin, ku ciyaraan, kuna qaataan waqtigooda maalinta.

Barbaarinta Caruurta waxaa laga heli karaa meel kasta oo ka mid ah gobolka waxaana heli kara canug kasta oo u qalma, iyada oo aan loo eegeynin dakhliga qoyska.



## Waa maxay Booqashada Guriga?



Department of  
Health

Booqashada Guriga waa adeeg iskaa ah, oo guriga ku saleysan oo qoyska lagu siiyo si bilaash ah. Soo booqdayaasha xanaaneynta iyo xirfada leh ee guriga waxay qoysaska ku xiraan xog iyo ilo taageero caafimaadka dhallaanka iyo qoyska oo dhan.

Taageerada Booqashada Guriga waxay hagaajin kartaa natijada uurka waxayna qoysaska gacan ka siin kartaa u diyaargaroobidda dhallaanka dhalanayo. Xitaa kadib marka uu dhallaanka dhasho, Booqashada Guriga waxay qoysaska ka caawin kartaa inay wax ka bartaan quidinta, hurdada, iyo sida looga dhigo canugga dhallaanka ah mid badqabo oo kobcayo.